# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Ciise iyo Sakhayos



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




Maalin baa, Ciise soo maray Yerixoo. Magaaladii burburiyey waayihimii sii horreysay ee Yashuuca. Iminka dib ayay u dhisantay oo dad farabada baa ku nooleyd halkaasi. Waxaana ka mid ahaa ninkan la yidhaahdo Sakhayos.





Inta badan dadka magaalada aad uma aysan jecleen Sakhayos sababta oo ah cnshuur qaade ayuu ahaa lacagta ka qaada iyaga. Sakhayos qaar lacagta uu qaado wuxuu u diri jiray dowladda-laakiin qayb badan buu kala hadhi jiray.

Inuu cnshuurqaade yahay Sakhayos hodan bay ka dhigtay. Aqalkiisana laga yaabe inuu midka ugu weyn xaafadda ahaa.



Laakiim isagu wuxuu ahaa aad u gaaban – ma aha in xagga lacagta ka gaaban yahay, laakiim xagga dhererka qof ahaanayd. Weligiina ma korin dherer ahaan dadka kale.




Markii uu maqlay
Sakhayos in uu
yimid oo uu joogo
Yerixoo, canshuurqaadihii yaraa wuxuu doonay inuu
arko Ninkan ka yimid Naasaret ee sheeganaya inuu
yahay Wiilka Ilaah. Laakiin dadkii badnaa aawadood
way adkayd … Dadkuna way dhaadheeraayen.



Sakhayos fikrad buu la yimid! Haddii horay uga ordo dadkan badan … Oo wuxuu fuulay geed jidka geeskiisa ku yaala … si uu u arko Ciise.



Wuxuu fuulay geed sukomoor ah, Sakhayos meel fiican buu ka helay ka helay laamihii oo uu ku fariisan karo inuu ku sugo Ciise. "Si fiican baan u arki karaa," laga yaabee inuu ku fikirayay. "Waan arki doonaa isaga iyadoon la i arkin kareyn."

"Sakhayosow, dhaqso u soo deg." Canshuurqaadihii yaraa dhegehiisa ma aysan rumaysan. Ciise wuxuu istaagay geedkii hoostiisa. Ciise wuu fiirinayay isaga. Ciise ayaa u yeedhaya isaga!





Haddii Sakhayos uu la yaabay inuu maqlo yeeridd Ciise, wuu amkaagay markii Ciise ku yidhi, "Maanta waa inaan gurigaaga joogo." Sakhayos wuu si dhaqso ah ayuu halhaleel uga soo degay oo wuuba dhici gaaray.

Sakhayos farxad ayuu Ciise ugu soo dhoweeyey gurigiisii. Laakiin dadkii ma aysan jeclaanin. Waxay ku ganuunaceen in aysan ahayn Ciise inuu booqdo dembiilayaasha sida Sakhayos oo kale.





Ciise wuxuu u keenay noloshii cusbayd oo idil Sakhayos. Sakhayos wuxuu yidhi, "Sayidow, maalkayga badhkii Ayaan masaakiinta siinayaa. Oo haddii aan nin wax ka dulmay, waxaan u celin doonaa afar laab."

Ciise raalli buu ka noqday nolosha cusub ee Sakhayos. Isagu wuxuu jeclaa inuu arko dadka ka soo noqonaya dembiyada oo samaynaya waxa ku quman ee hagaagsan. Ciise wuxuu yidhi, “Wiilka Aadanah wuxuu u yimid inuu kii hallaabay doondoonno oo badbaadiyo.”



Ciise iyo Sakhayos

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Luukos 19

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16